

Diyaarinta Nadiifinta Caloosha:

Beeritaanka saxarada oo qofka lagu shubayo Golytely

Waa muhim in aad raacdo **dhamaan** tilmaamaha lagu siiyo ee u diyaargarowga baaritaanka. Waa in jirkaagu nadiif ahaadaa sidoo kale si dhakhtarku u arki karo xilliga baaritaanka. Dadka qaar baa u arka in baaritaanka qeybta ugu adag ay tahay diyaarinta caloosha.

Isu Diyaarinta Baaritaanka

Maalin ka hor maalinta baaritaanka waxaa lagaa doonayaa inaad isu diyaariso baaritaanka. **Ha** cunincunto adag **gebi ahaan** maalinta ka horeysa baaritaanka. Waxa aad isticmaaleysaa **Golytely** ee nadiifinta mindhicirada.

Fadlan raac dhamaan tilmaamaha. Haddii **aadan** si haboon u raacin tilmaamaha waxaa suurogal ah in la **baajiyo** eegidda mindhiciradda. Si aad ugu diyaargarowdo eegidda mindhicirada, waxaa lagaa doonayaa inaad iibsato waxyaabaha caloosha lagu nadiifiyo.

Daawada aad iibsaneyso:

- **Farmashiyaha la xiriir oo ka qaado daawada lagu qoray ee Golytely/Nulytely/Colyte.**

Dukaanka aad ka adeegato:

Waxa aad ka iibsan kartaa (Crystal Light) si ay kaaga caawiso inaad isu diyaariso baaritaanka. Waa in aysan noqon midda **casaanka** ama **hurdiga** (purple) ka ah. (Khasab kuguma aha)

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilsan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Waxa ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadato ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa 1-844-795-1734. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Shan (5) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- **Ha qaadan** qaadan daawoyinka shubanka joojiya – Sida: Imodium ama Pepto-Bismol.
- **Ha qaadan** daawoyinka saraxada jiliciya – Sida: Metamucil ama Citrucel.
- **Ha qaadan** fatiimanada birta dhiiga xoojiya – Sida: Multi-vitamins.
- **Ha qaadan** fatimiin E ama daawada:

Sadex (3) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- **Wax yar oo cuntada caloosha jilicisa ku bilow - Ha qaadan** cuntada aad caloosha u jilciya tusaale ahaan: Daangada, miraha (gabaldayaha, lawska iyo salbukada), rootida sareenka ka sameysan, miraha la qariido, ansalaatada, qudaarta ceyriin, ama markaa la soo jaray ama qalalan. Xadid inta aad hilibka ka cunto.

Laba (2) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- Biyo badan cab (sideed galaas oo biyo ayaa lagula talinayaa).

Hal (1) cisho ka hor inta aan la beerin saxarada

- Biyo cad oo kaliya cab **maalinta oo dhan** maalinta ka horeysa eegista mindhicirka. **Ha cunin** cunto adag
- **9ka aroornimo** Ku dar dhalada biyaha Golytely/Nulytely/Colyte oo si wanaagsan u rux. Talaajada gasho Golytely Haddii aad jeceshahay inaad cabto iyada oo aan la qaboojin, ka soo saar talaajada **1da duhurnimo**
- **3da aroornimo** bilow cabitaanka Golytely/Nulytely/Colyte prep. Waa inaad cabtaa **dhamaan** waxyaabaha caloosha diyaariya ee aad qastay
- Waa inaad cabtaa **sideed wiqiyadood** koob ah 15kii daqiiqaba ilaa aad **dhamaan** ka dhameyso Waxa ay kugu qaadanaysaa afar ilaa lix saac in aad dhameyso waxyaabaha aad ku qastay. Waxa aad ku dari kartaa baakad Crystal Light **koob** kasta oo aad cabeyso si u wanaajiso dhadhanka.

- Dadka qaar baa dareema yalaalugo, matag ama dibiro Haddii ay taasi dhacdo, ka naso 15-30 daqiiqo ka dibna isku day inaad cabto waxyaabaha aad isku qastay. Waxaad dooneysaa inaad markiiba musqusha gaarto.
- Ha qaadan galabta horeysa balanta **Vancomycin**. Haddii aanu dhakhtarku sidaas ku farin.
- **Saqda dhexe** jooji cabitaanka biyaha cad. Markaas waad dhameysay **dhamaan** waxyaabihii qasnaa ee aad diyaarsatay.

Maalinta beeritaanka saxarada

- Waxa aad cabi kartaa **biyo** kaliya ilaa **afar saacadood ka hor** balanta aad ku **tageyso**. Waxa aad qaadan kartaa daawada **adiga oo biyo yar ku kabanaya**.
- Xusuusnoow inaad qaadan Vancomycin ama daawada lagu daweeyo cudurada bakteeriyadu keento. Haddii aanu dhakhtarku sidaas ku farin.
- Xusuusnoow **ha cunin cunto adag**.

